# JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA**

# XEER-NIDAAMIYAHA
# BAARITAANKA IYO XAQIIJINTA TAYO-DHAWRKA BADEECADAHA

Waxaa Diyaariyey: Wasaaradda Ganacsiga Iyo Warshadaha, Xukuumadda JFS 2023

**TUSMO**

**CUTUBKA kowaad** ........ **1**

**Qodobbo Guud** ........ **1**

Qodobka 1aad ........ **Error! Bookmark not defined.**

Qeexid ........ **Error! Bookmark not defined.**

Qodobka 2aad ........ **Error! Bookmark not defined.**

Magaca Xeer-nidaamiyaha ........ **Error! Bookmark not defined.**

Qodobka 3aad ........ 1

Ujeedada Xeer-nidaamiyaha ........ 1

Qodobka 4aad ........ 2

Baaxadda Xeer-nidaamiyaha ........ 2

**CUTUBKA LABAAD** ........ **2**

BAARISTA IYO BIXINTA BADEECADAHA SOO GALA DALKA ........ 2

Qodobka 5aad ........ 2

Maamulka Tayada Badeecadaha ........ 2

Qodobka 6aad ........ 2

Soo-saarista iyo Keydinta Hal-beegyada Dalka ........ 2

Qodobka 7aad ........ 2

Waafaqsanaanta Hal-beegyada Dalka ........ 2

Qodobka 8aad ........ 2

Shahaadada waafaqsanaanta Hal-beegyada Dalka ........ 2

Qodobka 9aad ........ 2

Badeecadaha aan Wadan Shahaadada Waafaqsanaanta Hal-beegyada Dalka ........ 2

Qodobka 10aad ........ 3

Codsiga Shahaadada Fasaxa La-bixidda Badeecadaha ........ 3

Qodobka 11aad ........ 3

Bixinta Shahaadada Fasaxa Badeecadda ........ 3

Qodobka 12aad ........ 3

Baaridda Badeecadaha Furdooyinka ........ 3

Qodobka 13aad ........ 4

Xaqiijinta Waqtiga Badeecadda ........ 4

Qodobka 14aad ..... 5
Reebbanaanta Sii-dayn Badeecad aan Lahayn Shahaado Fasax ..... 5
Qodobka 15aad ..... 5
Badeecad Lagu Sameeyey Dal Kale ..... 5
Qodobka 16aad ..... 5
Burburinta ama Dib-u-dhoofinta Badeecadda ..... 5
Qodobka 17aad ..... 5
Astaanta Tayada Badeecadda Dibadda Laga Keeno ..... 5
Qodobka 18aad ..... 5
Astaanta Xalaalnimada Badeecadda (Halal Mark) ..... 5
Qodobka 19aad ..... 5
Dhaqan-gal ..... 5
**JADWALKA 2AAD ..... vi**

# CUTUBKA KOWAAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Qeexid

Haddii aan si kale loogu sheegin xeer-nidaamiyahan gudihiisa, ereyadan soo socda wuxuu mid waliba yelanayaa macnaha ku horqoran:

**"Xeer-nidaamiye"** waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-dhawrka Badeecadaha JFS;

**"Hay'adda"**waxaa loola jeedaa Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;

"**Baarista Badeecadaha Furdooyinka**" waxaa loola jeedaa xaqiijinta waafaqsanaanta Badeecadaha ee hal-beegyada tayo-dhawrka ee lagu sameeyo Dekedaha, Garoomada iyo bar-xudduudeedyada Dalka, ama xarun kasta oo kale oo ay Hay'addu oggolaato;

"**Furdooyin**" waxaa loola jeedaa xudduudaha Dalka laga soo galo (dhulka, cirka iyo badda);

"**Badeeco**"waxaa loola jeedaa shay, alaab ama wax kasta oo ugu dambeyntii noqonkara wax laga ganacsado ama la isticmaalo;

"**Shahaadada fasaxa Badeecadda"** waxaa loola jeedaa dukuminti ay soo saartay Hay'adda oo caddeynaya in tayada Badeecadda la soo dejiyey ay waafaqsantahay jaan-gooyada Tayo-dhawrka;

"**Badeecadda Shatiga leh"** waxaa loola jeedaa Badeecadda ay sida joogtada ah u qiimeyso Hay'adda, una aragto inay waafaqsantahay hal-beegyada Dalka, gobolka ama caalamiga ah ee khuseeya iyadoo la isticmaalayo hab-raac la yaqaan;

**"Hal-beegyada Dalka"** waxaa loola jeedaa hal-beegyada iyo jaan-gooynta uu Golaha Hay'addu shaaciyey si waafaqsan xeer-nidaamiyahan;

"**Badeeco diiwaan-gashan**" waxaa loola jeedaa alaabaha leh heerar joogto ah oo ku aaddan waafaqsanaanta hal-beegyada Dalkaama caalamiga ah, oo ay macquul tahay in laga reebo tijaabada/hubinta Dalka;

**"Badeeco aan diiwan-gashaneyn**" waxaa loola jeedaa alaabada aan lahayn xog hore oo laga tixraaco inay waafaqsan yihiin hal-beegyada tayo-dhawrka, oo ay tahay in la tijaabiyo si loo xaqiijiyo waafaqsanaanta hal-beegyada Dalka;

**"Dabar"** waxaa loola jeedaa xayiridda isticmaalka iyo furitaanka Badeeco inta go'aanka waafaqsanaanta hal-beegyadu kasoo baxayo;

"**Wasiir**" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha ee Xukuumadda JFS; iyo

**"JFS"** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 2aad
### Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "**Xeer-nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-dhawrka badeecadaha"**

### Qodobka 3aad
### Ujeedada Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahaan Ujeedadiisu waxa ay tahay in lagu faahfaahiyo qodobada khuseeya ee sharci Lr.27, ee soo baxay 2020, Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Soomaaliyeed, si lagu dhaqan-geliyo.

### Qodobka 4aad
### Baaxadda Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dabaqayaa Dhammaan Badeecadaha soo gelaya bar-xuduudeedyada kala duwan ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

# CUTUBKA LABAAD
## BAARISTA IYO BIXINTA BADEECADAHA SOO GALA DALKA

### Qodobka 5aad
### Maamulka Tayada Badeecadaha

Si waafaqsan Qodobka 5aad(1) ee Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Soomaaliyeed, Lr. 27 soona baxay 2020, Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed (HTS) waa Hay'adda mas'uulka ka ah maamulka, hubinta iyo nidaaminta tayo-dhawrka Badeecadaha soo gelaya, kuwa ka baxaya, kuwa lagu sameeyo ama lagu isticmaalo Dalka.

### Qodobka 6aad
### Soo-saarista iyo Keydinta Hal-beegyada Dalka

Si waafaqsan Qodobka 24aad (1) ee Sharciga "**Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Soomaaliyeed, Lr.27"**, Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed (HTS)ayaa mas'uul ka ah tayo-dhawrka (quality control) iyo soo saarista, keydinta iyo baahinta xogahahal-beegyada Dalka.

### Qodobka 7aad
### Waafaqsanaanta Hal-beegyada Dalka

Lama soo gelin karo Dalka Soomaaliya Badeecado ay Hay'addu u dejisay hal-beeg, haddii aysan Badeecadaasi buuxin shuruudaha hal-beegyada u yaal.

### Qodobka 8aad
### Shahaadada waafaqsanaanta Hal-beegyada Dalka

1. Badeecadaha lagu xusay Jadwalka 1aad ee qeybta 1aad, waa inay maraan xaqiijinta waafaqsanaanta hal-beegyada Dalka, Gobolka iyo kuwa caalamiga ah kahor inta aan Soomaaliya lasoo gelin.
2. Badeecadaha lagu tilmaamay faqrada 1aad ee qodobkan, waa in ay wataan shahaadada waafaqsanaanta (Certificate of Conformity).
3. Hay'addu waxay furdooyinka ku yaalla Dekedaha, Garoomada iyo xuduudaha Dalka ka sameynaysaa hubin ku aaddan xaqiijinta in Badeecadaha xeer-nidaamiyahan lagu xusay waafaqsanyihiin Hal-beegyada Dalka, ha noqdeen Badeecadahaasi kuwo ganacsi loo keenay ama isticmaal kale.

### Qodobka 9aad
### Badeecadaha aan Wadan Shahaadada Waafaqsanaanta Hal-beegyada Dalka

1. Iyadoo aan wax loo dhimeynQodobka 5aadee xeer-nidaamiyahan, Badeecadaha ku xusan Jadwalka 1aad ee qeybta 1aad oo aan wadan shahaadada waafaqsanaanta, waa in la mariyaa baarista Badeecadaha ee furdooyinka (destinationinspection).
2. Soo-dejiyuhu hadddii uusan wadanshahaadada waafaqsanaanta waa inuu bixiyaa ganaaxa baarista uu qiimaheeda dhanyahay 15% (shan iyo toban boqolkiiba) qiimaha, caymiska iyo qaadista shixnadda (cost of insurance and freight –**CIF-**).

3. Haddii badeecadaha lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan ay waafaqsan yihiin shuruudaha hal-beegyadaDalka, Hay'addu waxay bixinaysaa shahaadada la bixintaanka Badeecadda.
4. Haddii Badeecadahu aysan waafaqsanayn shuruudaha hal-beegyada Dalka, Hay'addu waxay soo saaraysaa ogeysiin kusocota soo-dejiyaha oo ah inuu burburiyo ama uu dibudhoofiyo Badeecadda, iyadoo loo eegayo hadba khatarta ay Badeecaddu u leedahay degaanka iyo noolaha, iyadoo khidmadaha ku baxaya burburinta ama dib-u-dhoofinta laga rabo in uu bixiyo soo-dejiyaha.

**Qodobka 10[aad]**
**Codsiga Shahaadada Fasaxa la-bixidda Badeecadaha**

1. Soo-dejiyaha Badeecadaha ku xusan Jadwalka 1[aad] waa inuu ka codsadaa Hay'adda shahaadada fasaxa badeecadaha kahor ama marka ay Badeecadu timaado furdada ay kasoo galeyso Dalka.
2. Codsiga lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan waa in ay la socdaan:
   b. warqadaha Rarka Badeecadda(Bill of Loading) ama xamuul-diyaaradeedka (Airway Bill);
   t. liiska xirmada (**parking list**);
   j. shahaadada asalka Badeecadda (**certificate of origin**);
   x. qaan-sheegatada (**invoice**);
   kh. dokumintiga furdooyinka Badeecadu socdaalka ku soo martay (haddii uu jiro);
   d. shahaadada waafaqsanaanta, haddii ay jirto;
   r. codsiga lagu sheegay farqada (1) ee qodobkan waa in la sameeyaa kahor inta aan waaxda furdooyinku soo-dejiyaha u fasaxin Badeecadaha;iyo
   s. haddii Badeecaddu wadato shahaadada waafaqsanaanta, baaruhu waa inuu hubiyaa Badeecaddasi uu u xaqiijiyo inay badeecaddu waafaqsantahay midda ku xusan, Codsiga iyo Shahaadada Waafaqsanaanta.

**Qodobka 11[aad]**
**Bixinta Shahaadada Fasaxa Badeecadda**

Baaruhu wuxuu bixinayaa shahaadada fasaxa Badeecadda, haddii hubinta lagu ogaado in Badeecadda iyo shahaadada waafaqsanaantoodu is-leeyihiin.

**Qodobka 12[aad]**
**Baaridda BadeecadahaFurdooyinka**

1. Badeecadaha soo socda waa in lagu baaraa furdooyinka:
   b. badeecadaha ku xusan Jadwalka 1[aad] ee Qeybta 1[aad], ee yimaada furdooyinka Dalkaiyagoo aan wadan shahaadada waafaqsanaanta;
   t. badeecadaha ku xusan Jadwalka 1[aad] ee Qeybta 1[aad], ee yimaada furdooyinka Soomaaliya iyagoo wata shahaadada waafaqsanaanta, balse xaqiijin kadib baaruhu:
      i. u arko in aysan is-lahayn shahaadada waafaqsanaanta iyo Badeecadu; ama
      ii. uu ka shakiyo inaysan waafaqsaneyn hal-beegyadaDalka;
   j. Badeecadaha ku xusan Jadwalka 1[aad] ee Qeybta 2[aad], ee leh tilmaamaha soo socda:
      i. badeecadaha qiimaha ay ku saaran yihiin markabka (freight on board price FOB Price) aysan ka badnayn lacag SH. SO. u dhigma US$ 3,000.00 (saddex kun) oo doolarka Maraykanka ahna cunto, agabka carruurta, waxyaalaha la isku qurxiyo, fiilooyinka korantada, noocyada kala duwan ee doobiyo-

bareesyada, fooneeyeyaasha timaha, kirliyada korontada, qalabka cadceedda(solar), bareesyada iyo daare-demiyeyaasha;

ii. alaabada cayriinka ah ee Badeecadaha laga soo saaro oo sidooda looga ganacsanayo ama laga sameynayo Badeecado aan rukhsad ka haysan Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;

iii. mashiinada warshadaha iyo agabka lagu dayactiro warshadaha ee aan rukhsad ka haysan Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed ama hay'ad dawladeed oo kale oo loo idmaday, iyo haddii Mashiinada (qalabka) iyo agabka ganacsi loo keeno hay'ad dawli ah;

x. badeecadaha hoos yimaada heshiis is-af-garad oo Soomaaliya kala dhaxeeya hal wadan ama ka badan, uusanna baaruhu ku qancin inay leeyihiin tayadii looga baahnaa.

kh. badeecadaha lagu baaro furdooyinka waxaa baaraya oo hubinaya baare (inspector) si uu u go'aamiyo inay waafaqsan yihiin hal-beegyada Dalka.

d. baaruhu wuxuu muunad ka qaadan karaa Badeecadda u baahan in lagu baaro furdooyinka si uu ugu baaro sheybaar, una go'aamiyo inay waafaqsan yihiin hal-beegyadaDalka.

r. soo-dejiyaha Badeecadda waa inuu bixiyaa Khidmadda baarista Badeecadda ee furdooyinka iyo Khidmadda tijaabada muunadda haddii Badeecadda lagu baarayo sheybaarka(laboratory analysis).

s. Soo-dejiyaha Badeecadda u baahan in lagu baaro furdooyinka ayaa mas'uul ka ah khidmadda keydinta, baarista sheybaarka iyo kharash kasta oo kale oo ka dhasha baarista Badeecadda furdooyinka.

sh. baaraha waa inuu u soo saaraa badeecadaha uu go'aamiyo inay waafaqsan yihiin hal-beegyada Dalka"shahaadada fasaxa Badeecadda".

dh. haddii baaruhu go'aamiyo in Badeecadda, lagu baaray furdooyinka, aysan waafaqsaneyn hal-beegyada iyo jaan-gooyooyinka Dalka, baaruhu waa inuu maareeyaha Tayo-dhawrka ogeysiiyaa, maareeyuhuna:

i. soo saaraa ogeysiin uu ku farayo soo-dejiyaha in la burburinayo ama uu dib u dhoofiyo Badeecadda, kharashaadka ku baxayana uu bixiyo;

ii. wargeliyaa hay'adaha ay khusayso (marka ay ku habboon tahay), sida Waaxda furdooyinka (customs department)iyo/ama Booliska Soomaaliyeed;

iv. diido in Badeecadda la geliyo Dalka;

v. celiyaa Badeecadda haddii Badeecaddu ku jirto bakhaar u xiran waaxda furdooyinka; ama

vi. uu ku dhegan yahay dabarka hay'addu (SOBS store under seal).

## Qodobka 13aad
## Xaqiijinta Waqtiga Badeecadda

Haddii badeecaddu ay leedahay waqti qayaxan baaruhu waa inuu hubiyaa kahor inta uusan soo saarin shahaadada fasaxa Badeecadda in waqtiga Badeecadda ku xaddidan kuna qoran yahay ugu yaraan:

b. in waqtiga 1 (hal) sano ama ka badan uga harsan yahay, haddii waqtiga Badeecaddu uu ka badan yahay 1 (hal) sano;

t. ugu yaraan 50% (boqolkiiba konton) ay uga harsan tahay, haddii waqtiga Badeecadda uu yahay 1 (hal) sano ama ka yar.

**Qodobka 14$^{aad}$**
**Reebbanaanta Sii-dayn Badeecadaan Lahayn Shahaado Fasax**

Haddii aanu soo-dejiyuhu wadanin shahaadada fasaxa Badeecadda, baaruhu wuxuu kaliya oo Badeecaddaas u ogolaan karaa in lagu xareeyo bakhaarka maamulka furdooyinka ama keydka dabarka Hay'adda (SOBS store under seal), ilaa laga caddeeyo waajibaadka sharci ee lagu leeyahay soo-dejiyaha aan wadan shahaadada fasaxa Badeecadda.

**Qodobka 15$^{aad}$**
**BadeecadLagu Sameeyey Dal Kale**

Soo-dejiyaha badeeco lagu farsameeyey/laga soo saaray dal heshiis kala dhexeeyo Soomaaliya (oo labada dhinacba ay iska aqbalaan summadaha tayo ee badeecadaha ay soo saaraan), islamarkaana wadata summadda caddeynta tayada Badeecadda ee Dalkaas, wuxuu dalbanayaa islamarkaana la siinayaa shahaadada fasaxa Badeecadda, iyadoo aan Badeecaddaas la marsiin Qiimeynta Tayada Shixnadaha ka hor – (Commercial Banking & Credit Analyst) CBCA.

**Qodobka 16$^{aad}$**
**Burburinta ama Dib-u-dhoofinta Badeecadda**

1. Haddii la soo saaro ogeysiiska burburinta ama dib-u-dhoofinta Badeecadaha aan waafaqsaneynhal-beegyadaDalka, waxaa lagu fulinayaa muddo 14 (afar iyo toban) maalimo shaqo, iyadoo khidmadaha ka dhalanaya uu bixinayo soo-dejiyuhu.
2. Badeecadda waa in:
    b. la burburiyaa haddii aysan khatar weyn u geysaneyn degaanka; ama
    t. dib loogu celiyaa dalkii markii hore laga keenay, haddii ay khatar baaxad leh u geysaneyso bey'adda.
3. Badeecadda dib loo celinayo looma dhoofin karo dal kale oo aan ahayn dalkii laga keenay. Marka la fulinayo ogeysiiska dib-u-dhoofinta ama gubidda Badeecaddaha waa in loo fuliyaa si waafaqsan shuruucda khusaysa.

**Qodobka 17$^{aad}$**
**Astaanta Tayada BadeecaddaDibadda Laga Keeno**
**(Import Standardisation Mark (ISM)**

Badeecadwalba oo saameynaysa caafimaadka bulshada, bed-qabka degaanka iyo waxyaabaha korantada ku shaqeeya (electronics) inta aan la siin shahaadada fasaxa waa in la siiyaa "astaanta tayada Badeecadda dibadda laga keeno", haddii uu shuruudihii kale soo buuxiyey soo-dejiyuhu.

**Qodobka 18$^{aad}$**
**Astaanta Xalaalnimada Badeecadda (Halal Mark)**

1. Wax walba oo hunguriga la mariyo, taabta ama la marsado jirka (lagu subkado tin iyo oogomidayrabto ha ahaatee) ama la xirto (marasho iyo ilasho), waa in marka la hubiyo inay waafaqsanyihiin hal-beegyadaDalka ee xalaasha khuseeya la siiyaa "astaanta xalaalnimada Badeecadda".
2. Waxaa kale oo astaanta xalaalnimada (Halal Mark) qaadan kara badeeco walba oo astaan xalaal ka wadata hay'ad ama wadan heshiis is-aqoonsi kala dhexeeyo Hay'adda Taya-dhawrka Soomaaliyeed.

**Qodobka 19$^{aad}$**
**Dhaqan-gal**

Xeer-nidaamiyaha Baaritaanka iyo Xaqiijinta Tayo-dhawrka Badeecadaha JFS wuxuu dhaqan-gelayaa marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirradda, Ra'sul-wasaaruhuna Dekreeto ku soo saaro, laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**JADWALKA 1aad**

***Qodobbada Xeer-nidaamiyaha ee 5(1), 7(1); 7(2); iyo 7(4)***

**QEYBTA 1AAD**

**QEYBAHA BADEECADAHA LA MARSIINAYO QIIMEYNTA TAYADA SHIXNADAHA - CBCA**

| QEYBTA | QEYBAHA GUUD EE ALAABAHA | TILMAANTA |
|---|---|---|
| **QAYBTA 1** | Badeecadaha dawooyinka iyo agabka/qalabka la xiriira | Badecadahan waxay isugu jiraan daawooyinka, iyo dhammaan maaddooyinka caafimaadka, iyo agabka/qalabka loo isticmaalo ujeeddooyinka caafimaad. |
| **QAYBTA 2** | Korantada iyo qalabka elektarooniga oo ay ku jiraan qalabka cadceedda (solarka) | Badeecadahan waxay isugu jiraan dhammaan noocyada agabka ama qalabka soo saara ama ku shaqeeya korontada. Tusaale ahaan, dhammaan mishiinada iyo qalabka IT-ga (sida kumbuyuutarrada, daabacayaasha, iskaanarada, hard-drives-ka, processors-ka ,servers-ka, motherboard-yada, falaashyada, routers-ka, iwm), agabka guriga iyo jikada, agabka muusiga iyo codka, qalabka maqalka iyo muuqaalka, nidaamyada iyo agabka isgaarsiinta, qalabka leyrka, fiilooyinka, batariyada, isku-xirayaasha, daare-damiyaasha, furayaasha xiriirsan, matoorrada korontada, koronto-dhaliyeyaasha, gudbiyeyayaasha, dheelitirayaasha korontada (drives) qalabka farsamada gacanta ee korontada ku shaqeeya, qalabka qaybinta shidaalka, TV-yada iyo qalabka la xiriira TV-ga, qalabka saaluunka/is-quxinta, mashiinada madadaalada & mishiinada adeega gaarka ah, iyo dhammaan agabka cadceed (solarka AC (mukeeyfyada) iwm. |
| **QAYBTA 3** | Cuntooyinka iyo alaabaha cuntada laga sameeyo | Dhammaan badeecadaha la cuno ee cayriinka ah ama warshadaysan, iyo walxaha loo isticmaalo diyaarintooda. Waxaa kamid ah cuntada diyaarsan, cabitaannada aashitada leh, alaabaha ay ku jirto ama aysan ku jirin nikotiinka ee loogu tala-galay in la nuugo,la neefsado iyada oo aan guban, iyo alaabaha kale ee nikotiinka ku jira ee loogu talagalay in la nuugo oo jirka bani'aadamka la geliyo iwm. |
| **QAYBTA 4** | Alaabaha macdanta oo ay ku jiraan batroolka | Cusbada, maaddada Sulphur-ka, carrada iyo dhagaxa, macdanta malaaska (tusaale: ciidda, quartz-ka), lime-ta iyo shamiintada/sibirka oo ay ku jirto maaddada kaolin-ka; macdanta shidaalka, saliidda (ooliyada) iyo alaabaha la qaaciyo (batroolka, naftada iwm); Iskudhisyada kiimikada ah ee aan |

| | | |
|---|---|---|
| | | organic ahayn ee biraha qaaliga ah, walxaha shucaaca, iyo dhammaan kiimikooyinka organica ah. |
| **QAYBTA 5** | Xoolaha nool | Dhammaan xoolaha nool. |
| **QAYBTA 6** | Waxyaabaha kimikada ah | Dhammaan walxaha la sifeeyey ama la diyaariyey, gaar ahaan kuwa gacan ku sameyska ah. Qeybtan waxaa kamid ah dhammaan waxyaabaha la isku qurxiyo, cadarada/baraafuunada, kiimikooyinka lagu dhaqo biyaha, bacrimiyeyaasha, sunta cayayaanka, sunta loogu tala-galay waxyaabo gooni ah oo cayayaan ah, sunta dhirta, sunta funguska iyo waxyaabaha guriga loo isticmaalo sida saabuunta iyo nadiifiyeyaasha, gaas-daarayaasha, taraqa, shumaca, sigaarka, alaabaha batroolka, ooliyada, shidaalka, alaabaha nadaafadda, tarmuusyada, alaabaha carruurta lagu ciyaarsiiyo, alaabaha jikada, xabagta, rinjiga guryaha ee dhismayaasha, jeestada, qoray-dhukayga, dhalaaliyayaasha, iwm. |
| **QAYBTA 7** | Alaabaha carruurta | Dhammaan alaabaha ay ku ciyaaraan carruurta, boombalayaasha, baabuurta carruurta iyo agab kasta oo lugo leh, agabka xujooyinka/madadaalada,iwm. |
| **QAYBTA 8** | Qalabka makaanikada, qalabka dhismaha iyo agabka gaaska | Dhammaan alaabaha loo isticmaalo farsamada gacanta, injineeriyada, makaanikada iyo/ama dhismayaasha. Waxaa hoos yimaada qalabka farsamada, qalab-marineedka (Conduits and Fittings), Alaabaha birta ka sameysan, alaabaha saqafka, qalabka cabbirka, dhagxaanta dhismaha, alaabaha dhoobka ah, tubbooyinka, biraha dhismaha, alaabaha aluminium-ka iyo birta ka sameysan, haamaha gaaska (ambuubada), furayaasha iyo qufullada, biraha daahyada iyo wixii raaca, kumbasoorayaasha, iyo alaabaha wax lagu nashqadeeyo. Agabka gaaska waxaa kamid ah kuleyliyaasha, burjikooyinka, haamaha gaaska(ambuubada), shooladaha, feynuusyada iwm |
| **QAYBTA 9** | Warqadaha iyo agabka qoraalka | Dhamaan waxyaabaha warqadda ka sameysan, buugaagta, waraaqaha daabacaadda, waraaqaha koobiga, waraaqaha suuliga, agabka qoraalka, sabbuuradaha, alaabaha stationary-ga iyo iwm. |
| **QAYBTA 10** | Alaabaha guriga la dhigo (kuwa alwaaxa iyo kuwa birta ah) | Dhammaan alaabada guriga ama xafiiska la dhigo ee ka sameysan alwaaxa, geedka bambuuga (del-ka) iyo birta. Waxaa kamid ah |

| | | |
|---|---|---|
| | | noocyada kala duwan ee kumusaatooyinka sida Sheets, strips, panels for veneering, fibre boards, densified wood iyo iwm |
| **QAYBTA 11** | Alaabaha ka sameysan dunta, haragga, balaastiga iyo bambiirada | Dhamaan alaabta ka samaysan dunta, balaastiga, haragga iyo bambiirada. sida maro-kaneecada, go'yaasha sariirta, timaha burukada, agabka balaastigga, kabaha, suumanka iwm |
| **QAYBTA 12** | Alaabaha celiska ah oo ay ku jiraan baabuurta lasoo isticmaalay | Dhammaan waxyaabaha celiska ah sida dharka, kabaha, waxyaabaha korontada iyo elektiroonigga ah, baaskiillada, mootooyinka, alaabaha guriga la dhigto iyo baabuurta iwm. |
| **QAYBTA 13** | Badeecadaha iyo agabka dayactirka gaadiidka | Dhammaan alaabta/qalabka la xiriira baabuurta, gaadiidka iyo baaskiillada. Waxaa kamid ah qeybaha spare-partiska ama agabyada dayactirka, sida batariyada, taayirada iyo tubooyinka gudaha taayarka, baaskiillada, spare parts-ka la xiriira mishiinada/qalabka beeraha, garneellada iwm |
| **QAYBTA 14** | Qalabka badbaadada | Dhammaan alaabta loo xirto taxaddarka iyo badbaadada aadanaha ama loo isticmaalo is-dhawridda. Tusaalooyinka badeecadahan waxaa kamid ah galoofisyada, suumanka kursiyada gaariga, kabaha, koofiyadaha, qalabka dab-demiska, bustayaasha, qalabka amniga elektaroonigga ah, gambaleelka digniinta dabka, iwm. |
| **QAYBTA 15** | Gaadiidka, diyaaradaha, maraakiibta iyo qalabka rarka/xamuulka la xiriira iyo shidaalka (petrochemicals) | waxaa kamid ah gaadiidka, diyaaradaha, maraakiibta iyo qalabka socdaalka la xiriira oo ay ku jiraan mootooyinka iyo shidaalka iyo waxyaabaha shidaalka laga sameeyo (petrol and petrochemicals) |

## QEYBTA 2^AAD

**BADEECADAHA AAN LAGA RABIN INAY SOOMARAAN QIIMEYNTA TAYADA SHIXNADAHA KA HOR (CBCA) IYO BAARISTA**

1. Shixnadaha qiimaha ay ku saaran yihiin markabka (frieght onboard Value **FOB**) aanu ka badneyn US$ 3,000.00 (saddex kun) doolarka Maraykankamarka laga reebo badeecadaha khatarta leh ee lagu faahfaahiyey Qodobka 9^aad (1) (c) (i).
2. Badeecadaha gaarka ee loogu talo-galay mashruuc dawladeed, kuwaas oo soo-iibintooda loo maray nidaam tayo-dhawr oo dammaanad-qaadaya inay waafaqsan yihiin hal-beegyadaDalka.
3. Walxaha ceyriinka ah ee loo keeno si loogu isticmaalo wax-soo-saarka warshadaha oo aan la iibineyn;

4. Shixnadaha safaaradaha/diblomaasiyadeed.
5. Alaabaha gaarka ah ee muwaadiniinta Soomaaliyeed oo Dalka kusoo guryo-noqonaya ama qurba-joogta ah iyo ajaanibta.
6. Alaabaha hoos yimaada heshiiska aqoonsiga tayo-dhawr ee wadaagga ah.
7. Mashiinada (qalabka) warshadaha iyo agabka loo keeno si loogu isticmaalo wax-soo-saarka ee aan iibka aheyn.
8. Alaababa iyo badeecadaha xoolaha ee hallaawgoodu dhawyahay.
9. Qalabka iyo agabka milatariga, booliska iyo xabsiyada.
10. Xoolaha nool oo ay ku jiraan kalluunka nool, xayawaan-badeedka qolofta leh ee nool, iyo noolayaasha kale ee biyaha.
11. Shahwada xoolaha.
12. Ukumaha kalluunka.
13. Dhirta nool iyo abuurka lagu beero dhirta oo ay ku jiraan agabka beerista dhirta, iyo waxyaabaha la xiriira.
14. Xubnaha, qanjirada iyo dhiiga bini'aadamka, iyo waxyaabaha la xiriira.
15. Walxaha shucaaca bixiya.

**QEYBTA 3[AAD]: BADEECADAHA AANLA OGGOLAYN IN LASOO GELIYO DALKA**

| ALAABAHA MAMNUUCA AH |
|---|
| Hilibka doofaarka, baruurta, dhogorta, dhiigga, mindhicirka, xubnaha, iyo wax kasta oo laga soo saaro doofaarka. |
| Hilibka raha (rakaha). |
| Daawooyinka jawiga baddela iyo dhammaan maan-dooriyeyaasha noocyada, magacyada iyo qaabkasta oo ay leeyihiin. |
| Khamriga iyo maan-dooriyaha sunta ah nooc walba oo ay yihiin. |
| Tubaakada nuuckastoo ay tahay (Tubaakada la calaliyo, tubaakada naswaarka(budada ah), mida shiishiidka (sawika), iwm). |
| Qashin kasta oo ka yimaada warshadaha soosaara; daawada, kimikada, qashinka ka dhasha wax–soo-saarka, iwm (industrial wastes). |
| Cuntooyinka laga sameeyey dhiigga xoolaha. |
| Qalabka, mashiinada, iyo waxyaabaha loo isticmaalo khamaarka. |
| Agabka xayeysiinta sigaarka. |
| Maan-dooriyaha tabuuga (taboo drugs). |
| Wax walba oo lid ku ah shareecadda Islaamka. |

Badeecadaha mamnuuca ah si gaar ah waa la soo gelin karaa Soomaaliya iyadoo oggolaansho gaar ah laga helayo Hay’ad dawladeed ama Maamulka ay khuseyso ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**QEYBTA 4[AAD]: BADEECADAHA LA XADDIDAY IN LA SOO GELIYO SOOMAALIYA**

| BADEECADAHA LA XADDIDAY | HAY'ADDA RUKHSADA SOO-DHOOFINTA BIXINAYSA |
|---|---|
| Eeyaha | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha |
| Cuntada Xoolaha | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha |
| Dhamaan maadooyinka sida:-Sodium chloride, Paraffin wax, Ammonium nitrate, Sodium Nitrate, Potassium Chloride, Gelatine, Gunpowder, waxyaabaha qarxa, kaabsulka qarxa ama olola, korantada gubanaysa iyo alaabaha qarxa, macdanta saliidda, polymer acrylic, fiyuusyada qarxa, burburada iyo budada nitrocellulose-ta, aluminium, magnesium, qalabka raajada iyo ilaha kale ee shucaaca iyo tallaalka xoolaha | Hay'adda ay khuseyso |
| Daawooyinka loogu tala-galay dadka | Wasaaradda Caafimaadka |
| Daawooyinka xoolaha | Wasaaradda Xanaanada Xoolaha |
| Kiimikada bacriminta beeraha | Wasaaradda Beeraha |
| Buulalerada munaasabadaha iyo dabaal-degyada | Wasaaradda amniga |
| Baaruudda, walxaha qarxa, fiyuusyada badbaadada, fiyuusyada qarxa | Wasaaradaha amniga, iyo Gaashaandhigga |
| kaabsulka qarxa ama olola | Wasaaradda amniga iyo Gaashaandhigga |
| Sunta beeraha ee cayayaan dilayasha | Wasaaradda beeraha |
| Calaamadaha millitariga, jaakadaha xabbada karin iyo dareeska ciidamada, koofiyadaha ciidamada, | Millatariga, Wasaaradda Amniga |
| Milatariga, jeebbooyinka, ookiyaalayaasha aragga habeenkii, budadka maasada leh iyo doorbiinnada. | Millatariga, Wasaaradda Amniga |
| **Daawooyinka la isku daro ee keenakhataraha caafimaad iyo kuwa degaanka** | Wasaaradda Caafimaadka iyo degaanka |
| **Qaadka ama miraa** | Wasaaradaha Ganacsiga, Beeraha iyo caafimaadka |

Dhamaan Badeecadaha la xaddiday waxaa si gaar ah loo soo gelin karaa Soomaaliya keliya marka fasax/oggolaansho gaar ah laga helo Hay'adda ay khusayso ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## JADWALKA 2AAD

1. **Astaanta Tayadda Badeecadaha Dibadda Laga Keeno (Import Standardisation Mark) (ISM))**

2. **Astaanta Xalaalnimada Badeecadda (Halal Mark)**